

Sebteembar 4, 2024

## **Dugsiga dhexe Columbia iyo Dugsiga sare Lakeside waxay Kasbadeen Magacyada Sharafeynta ee 'Dugsiga Heerka sare' ee Qaranka PTA**

Dugsiga Dhexe Columbia iyo Dugsiga Sare Lakeside waxaa lagu sharfay magacaabisyada Dugsiga heerka sare ee 2023-2025 oo kobcinta iskaashi adag ee u dhexeeya qoysaska iyo dugsiyadooda, iyagoo xoojinayo waaya aragnimada waxbarashada lyo fayo qabka guud ee ardaydoo dhan.

Xiliga Agoosto 5, [Waalidka Qaranka-Ururka Macalinka](#) ayaa ku dhawaaqay in labadaan dugsiyo ee Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb (DCSD) ay ka mid ahaayeen 319 dugsiyo iyo PTA wadankoo dhan iyo Waaxda Difaaca dugsiyada ee Yurub si ay u helaan sharaftaan. Dugsiyada iyo PTA-yada waxay ka qeybqaateen barnaamijka Dugsiga Heerka sare ee Qaranka PTA, kaasoo ku lug leh ka go'naanta sannadka-dheer ee lagu xoojinayo iskaashiyada qoyska-dugsiga. Dhaqtar LaTroya Bishop, Xafiiska Ka qeybgelinta Waalidka iyo Qoyska ee Dugsiga Dhexe ee Columbia, wuxuu sharaxay in u magacaabida Dugsiga Heerka sare ay u tahay guul weyn dugsiga.

“Aad ayaan ugu faraxsannahay waaladiinteena, ardaydeena, iyo bulshada, waxaa yiri Dhaqtar Bishop. “In ka badan 4,000 oo dugsiyo ayaa lagu abaalmariy magacaabista wadankoo dhan, oo kaliya 16 ayay Georgia ahaayeen. 16 kaas, kaliya laba ayaa ka noqday Gobolka DeKalb, taasoo xattaa ka dhigeysa mid aad noogu gaar ah, oo aad ayaan ugu faanaa in naloo tixgeliyo dugsiga heerka sare!”

Xubinta Dugsiga dhexe Columbia PTA Marsha Herring ayaa aaminsan in Columbia ay mudantahay sharafta.

“PTA-ga dugsigeena dhexe wuxuu qabtay shaqo cajiib ah oo ah inay ka qeybgeliyaan ama ku joogteeyaan bulshada Gobolka guusha aqoonyanadeena, “Gabar Herrings ayaa tiri. “Waxaan si toos ah u arkay dadaalkeena PTA iyo ka go'naanta isbadel loogu sameeyo dugsiga iyo bulshada. Helitaanka abaalmarintaan waxay guul weyn u tahay PTA-geena.”

Sannadkoo dhan, PTA-yada iyo dugsiyada waxay aruuriyaan jawaab-celinta bulshooyinka dugsigooda oo waxay hormariyeen oo ay hirgeliyeen qorshayaal lagu xoojiyo ka qeybgelinta qoyska oo ku saleysan Heerarka Qaranka PTA ee Iskaashiyada Qoyska-Dugsiga.

“Meesha PTA, waxaan si adag u aaminsannahay in iskaashiyada qoyska iyo dugsiga uu yahay mid muhiim ah oo ay runtii qaadato in dhammaanteen si wadajir ah uga shageyno taageerida guusha ardaydeena iyo wanaajino dugsiyadeena, “waxaa yiri Yvonne Johnson, madaxweynaha Qaranka PTA.

“Waxaan ku faraxsannahay inaan sharafno dhammaan kuwa loo magacaabay Dugsiga Heerka sare ee 2023-2025 oo ka go'naantooda ay ku dhisaan iskaashi adag, iskaashiyada qoyska-dugsiga

oo waxtar leh oo leh ama sii joogteeyo inay ku yeeshaan saameyn fiican ardaydoo dhan, qoysaska, iyo dugsiyadooda."

Maamulaha xafiiska hore ee Dugsiga Sare Lakeside, Melanie Stockwell, oo sidoo kale xubin ka ah PTSA ee dugsiga, ayaa sheegtay inaysan la yaab aheyn in Lakeside ay heshay magacaabista Dugsiga Heerka sare ee Qaranka.

"Sannado badan, Lakeside PTSA waxay abuureen xubinnimo firfircoон ee bulshada oo taageerta ardaydeena iyo macalimiinta," ayay tiri Gabar Stockwell. "Waxaan si daacad ah u dhihi karaa, anoo qof ahaa labadaba xubin waalid iyo xubin shaqaale, in Lakeside PTSA ay tahay mid ka mid ah sababaha ugu muhiimsan ee Lakeside ay u sii guuleysaneyso. PTSA-geena waxay runtii ku caawisaa u mideynta ardaydeena iyo shaqaalaheena sida qoys ahaan."

XXX